

Washington State WIC Nutrition Program (Barnaamijka Nafaqada WIC ee Gobalka Washington)

Bayaanka Foomka Dhaqaalaha

(Cadaynta Dhaqaalaha)

Staff:

1. Use this form when proof of income doesn't exist. For example: The person has no income, works for cash, or income documentation was destroyed in a house fire or natural disaster.
2. Enter the self-reported household income in Cascades and assess if it meets WIC guidelines.
3. Select "Statement of Income" for proof of income. This form is the person's proof of income.

Kaqaybgalaha, Waalidka masuulka ama Daryeelaha:

Markaan saxiixo foomka waxaan cadaynayaa:

- Mahaysto wax cadayn ah oo muujinaaya qarashka isoo galay bishaan (30 maalmod ee lasoo dhaafay), ama mahaysto wax cadayn ah oo muujinaaya qarashka isoo galay dhamaan ama qaar kamid ah 12 bilood ee lasoo dhaafay (WIC ayaa qiimayn kuwada qarashka isoo gala sanadkii).
- Mahaysto cadaynta dhaqaalaha isoo gala sababaha soosocda midkood:
 - Mahaysto wax dhaqaale ah.
 - Waxaan mushaar uqaataa lacag kaash ah mana haysto dukumiintiyada cadaynta dhaqaalaha.
 - Dukumiintiyada dhaqaalihii isoo galay waa laburburiyay, tusaale ahaan waxay kugubteen guriga ama masiibo dabiiciya oo dhacday daraadeed.
 - Waxaan ahay qof aan hoy lahayn ama soogalooti ah mana haysto wax cadayn dhaqaale ah.
- Dhamaan macluumaadka aan siiyo WIC waa mid dhab ah oo sax ah ilaa inta aan ogahay.

Haddii aan WIC siiyo macluumaad been ah, waxaa suurtagal ah in qoyskayga laga saaro barnaamijka ama waxaa qasab nagu noqon karta inaan dib ubixino gunooyinkii nala siiyay ee WIC.

Saxiixa Kaqaybgalaha/Waalidka Masuulka/Daryeelaha

Taariikhda

WIC Nutrition Program cidna ma takooro.

Si waafaqsan sharciga xaquuqda madaniga ah ee heer Federaal iyo shuruucda iyo xaquuqaha madaniga ah ee U.S. Department of Agriculture (USDA, Wasaaradda Beeraha ee Maraykanka), waaxda USDA, wakaaladaheeda, xafiisyadeeda, iyo shaqaalaha, iyo hay'adaha qaybta ka ah ama fulinaaya barnaamijyada USDA waxaa xaraan ka ah inay dadka utakooraan sababo laxariira isir, midab, asalka uu kasoo jeedo qofku, jinsiga, naafada, da'da, ama cad goosi ama aargoosi sabab laxariirta xaquuqda madaniga ah oo qofku karaadsado wax kamid ah barnaamijka ah oo ay fulinayso USDA.

Dadka naafada ah oo ubaahan hab isgaarsiineed kale ee macluumaadka barnaamijka (tusaale, farta indhoolka, khad waawayn, cod duuban, Luuqada Dhagoolayasha Maraykanka iyo wixii lamid ah.) waa inay laxariiraan wakaalada (heer Gobal ama tan maxaliga ah) oo ay kacodsadeen gunooyinka. Shaqsiyaadka dhagaha la'a maqalka culus oo uu hadalku dhibaayo waa inay laxariiraan USDA ayadoo adeegsanaaya Federal Relay Service (Laynka Adeegyada Dhagoolayaasha) ee USDA oo lambarkoodu yahay (800) 877-8339. Waxaa intaas siidheer, macluumaadka barnaamijka waxaad kuheli kartaa luuqada kabaxsan af Ingiriisiga.

Si aad udirsatoo cabasho kadhah ah barnaamijka oo takoorka laxariirta, buuxi [USDA Program Discrimination Complaint Form \(Foomka Cabashada Takoorka ee USDA\)](#), (AD-3027) oo aad oonleen ahaan uga helayso: http://www.ascr.usda.gov/complaint_filing_cust.html, aadna sidoo kale kahelayso xafiis kasta oo ay USDA leedahay, ama waraaq qoran udir taasoo ay kuqoran yihiin dhamaan macluumaadka foomka kuyaalay. Si aad ucodsato koobiga foomka cabashada, wac (866) 632-9992. Ugudbi USADA foomkaaga ama warqaddaada aad buuxisay adoo:

Boosto ugudir: U.S. Department of Agriculture
Office of the Assistant Secretary for Civil Rights
1400 Independence Avenue, SW
Washington, D.C. 20250-9410;

Fakiska: (202) 690-7442; ama

limaylka: program.intake@usda.gov



Hay'addaan waa adeeg bixiye ku shaqeysa fursadaha loo simanyahay.
Washington State WIC Nutrition Program cidna ma takooro.

